



**HAGAHA OOGISTA DAMBIYADA KA DHANKA AH
TACADIYADA JINSIGA EE SOMALILAND**

TUSMADA

Hordhac.....	1
1. Doorka Dacwad Oogaha	2
2. Habka dhibanaha u wanaagsan	3
3. Daryeelka Dhibanaha iyo Caafimaadka.....	3
4. Ilaalinta sirta ee dacwadaha tacadiga jinsiga ku salaysan.....	4
5. Talaabooyinka lagu ilaalinayo sirta	4
6. Talaabooyinka ay qaadayaan dacwad oogahayaashu inta uu kiisku socdo	5
6.1 Talaabada 1aad – In dib loo eego galka booliska, go’aan in laqaato lagu oogayo ama aan lagu oogayn.....	5
6.2 Talaabad 2aad – Diyaar garawga Dacwada	6
b) <i>La tacaalida dhibanayaasha/maragyada caruurta ah</i>	6
c) <i>Xaqiijinta cadaymaha</i>	7
d) <i>Dacwad bilaabida</i>	7
e) <i>Go’aansashada eedaynta</i>	7
f) <i>Soo bandhigida cadaymaha</i>	8
6.3 Talaabada 3aad – udiyaar gorowga dacwada ka hor.....	8
6.4 Talaabada 4aad – Dacwada	9
6.5 Talaabad 5aad – Dacwada ka dib	10
LIFAAQA KOWAAD: QAABDHISHMEEDKA SHARCIGA QARANKA.....	11
LIFAAQA LABAAD : WAREEGTADII XEER ILAALIYAHA GUUD EE KUFSIGA	12
LIFAAQA SADEXAAD: KUFSIGA	14

Hordhac

Hagahan waxaa loogu tallo galay inuu sii xoojiyo tobabaradii uu bixiyay macadka Horizon sanadihii 2014 – 2015 si loo caawiyo oogista dacwadaha ku salaysan jinsiga ee ay galaan dacwad oogayaasha Somaliland iyadoo la ilaalinayo dhibanaha, cadaalad na loo samaynayo eedaysanaha.

Wuxu sharaxayaa doorka ay ku leeyihiin dacwad oogayaashu dacwadaha ku salaysan jinsiga, wuxuu qeexayaa habka ugu fiican ee dhibanaha iyo talaabooyinka ay marayaan dacwad oogayaashu inta uu kiisku socdo.

Waa mawduuc uu Xeer Ilaaliya Guud ahmiyada siinayo Isagoo ay ka go'an tahay xafiiskiisa iyo dawlada Somalilandba in la xaqiijo nidaamka maamulka cadaalada ee ilaalinyana dadka jilicsan, iyadoo cadaalad loo samaynayo, sharcigana si iskii ah loogu dabaqayo.

1. Doorka Dacwad Oogaha

Guud ahaan waxay dacwad oogayaashu ka ciyaaran door muhiima si loo qaado dacwad xaq ah, cadaalad loo siman yahay iyo inay muwaadiniinta ka ilaaliyaan dambiga. Waxay masuuliyadi ka saaran tahay inay ilaaliyaan mabaadii’da baaqa caalamiga ah ee ilaalinta xuquuda aadamaha:

- 1) **In sharciga hortiisa laga wada** sinaado – Dhamaan muwaadiniintu way ka siman yihiin sharciga hortiisa iyadoon loo eegayn jinsigooda, isirkooda, arimaha kale iyo waxkasta oo kale.
- 2) **In loo aqoonsado bilaa dambi** – Qof kasta oo la soo eedeeyay waa in loo aqoonsadaa bilaa dambi ilaa inta lagu cadaynayo, iyadoo cadaymaha iyo sharciga la eegayo. Eedaynahu waa inaanu isagu is cadayn inaanu dambi lahayn, Dawladu waa inay cadaysaa iyadoon shaki ku jirin inuu dambiile yahay.
- 3) **Xaqa dacwad furan oo xaqa oo ay maxkamad dhexdhexaada qaadayso** – Maxkamuduhu waa inay dhagaystaan dacwadaha iyagoo sharciga iyo cadaymaha dabaqaya kaliyaata, ayna ogaadaan waxwalba oo cadaaladdaro ah oo saamaynaya xukunkooda.

Oogitaanka dacwadaha ku salaysan tacadiyada jinsiga, waxay dacwad oogayaashu leeyihiin laba door oo kala ah inay baadhaan iyo inay oogaan iyo habka u wanaagsan dhibanaha dhexgaliyaan baadhitaanka iyo oogistaba iyagoo siinaya dhibanayaasha waxyaaba ay u baahan yihiin ee ah ilaalin, sifiican loola dhaqmo iyo in la is garab taago oo la taageero.


Baadh oo oogna	Ilaali (Aqoonso baahiyaha dhibanaha kana feejignow sidaad u ilaalin lahay)
Bilow dacwada ciqaabta ah, baadhitaanka gal, kormeerna siday u socoto dacwada ciqaabtu adigoo matalaya dawlada.	Si firfircoon uga qayb qaado habka dhibanaha u wanaagsan
Samee dacwad oogis xaq ah	Si naxariis leh ula dhaqan dhibanayaasha tacadiyada ka dhanka ah jinsiga, ixtiraana sharaftooda.
Si taxadar le hula soco qaybaha dambiga	Xaqiiji inuu dhibanuhu og yahay xuquuqdiisa iyo waxa laga filayo habka: <ul style="list-style-type: none"> • Xaqa magdhawga • Doorka uu ku lahaanayo dacwada • Xaqa inay cabiraan fikirkooda iyo dareenkooda • Xaqa in la ilaaliyo sirta • Xaqa in la dadajiyo baadhitaanka iyo oogista dacwada
Soo bandhig noocyada cadaymaha kala duwan si aad u cadaysa in falkaa la sameeyay	Caawi oo taageer dhibanaha intay dacwadu socoto
Tixraac wareegtadii uuso saaray Xeer Ilaaliyaha Guud, inaanay dacwad oogayaashu qayb ka ahayn in dhexdhexaadin ama wada hadal laga galo dacwadaha ku salaysan jinsiga.	Xaqiiji inu dhibanuhu helay magdhawgii dhibta soo gaadhay
Inaad u dhaqantan si waafaqsan Koodhka loo dajiyay mihnadlayaasha/dacwad oogayaasha (2013)	Ka caawi dhibanaha inuu helo adeegyada kale sida caafimaadka, latalin iyo waxyaabaha kale halka ay ka heli karaan

2. Habka dhibanaha u wanaagsan

“ ...go'aanka in lasoo wargaliyo dacwad kufsi waxaa iska leh qoyska dhibanaha iyo odayaasha. Qoysaska ayaa isku waafaqi kara inay dacwada kala baxaan maxkamada hadii qoyska dhibanaha magdhaw la siiyo, laakiin dhibanaha waligii waxba kama soo gaadhaan. Odayaasha uunbaa qaata lacagta. Haddii gabadh la kufsado, waxay marka koobaadba u sheegaysaa qoyskeeda iyagaana go'aan sanaya hadii ay dacwad maxkamada gaynayaan iyo in kale. Dhibanahu door kuma laha in dacwada lagu qaado habka nidaamka ciqaabta ah iyo habka xeerka dhaqanka. Waa waalidada kuwa go'aan sada.....cidina ma waydiiso dhibanaha in dacwada lagu qaado maxkamada.....inta badan gabdhaha (dhibanayaasha) dambiyada kufsigaha ah loo gaysto waxay da'doodu u dhaxaysaa 15 ilaa 20 sano jir, sidaa daraadeed wax door ah kuma laha. Waa waalidka kuwa kaantaroolaa.

Adeeg bixiyaha sharciga

Habka u wanaagsan dhibinuhu waxay ka hadashaa danaha dhibanaha ee ah qaybaha ugu muhiimsan ee lagu oganayo baahiyaha dhibanaha. Habka sharciga waa qayb ka mida habka lagu taageerayo laguna ilaalinayo dhibanayaasha. Danaha ugu fiican ee dhibanaha ayaa muhiimada lasiinayaa. Tan waxa ku jira in aan la oogin uun dacwada ee ay dacwad oogayaashu ogaadaan in dhibanuhu uu yahay qofka go'aanka gaadhaya laakiin ayna ahayn qoyska iyo dadka kale ee danaynaya.



FSU Hagaha qaadista dacwadaha ka dhan ka jinsiga ee wadanka Siiralyoon

3. Daryeelka Dhibanaha iyo Caafimaadka

Doork Aasaasiga ah ee xirfadlayda caadimaadku waa inay daaweeyaan dhibanaha

Daawaynta	Shaybaadhka	Baadhitaanka	Kaydinta cadaynta
Dhaawacyada iyo cudurada galmada la isku qaadsiiyo	Cudurada galmada la isku qaadsiiyo sida HIV/AIDS iyo uurka	Waraysi	Sharaxaada iyo kala saarida
Xaalad degdega ah		Baadhitaano dhamaystiran	Ururinta cadaymo FORENSIKADA AH.
Qorshayaal dabagal daryeel		Baadhitaan xaga danbe ah	

4. Ilaalinta sirta ee dacwadaha tacadiga jinsiga ku salaysan

Dhibanahu wuxuu xaq u leeyhay badqab iyo in la ilaaliyo sirtiisa. Dambiyada kadhanka ah jinsiga aadbay u xasaasi yihiin waxayna leeyihiin saamayn kala duwan oo dhaawaca kaba daran sida inuu qofku maskaxda wax ka noqdo ama bulshada dhib kala kulmo. Dambiyada ku salaysan tacadiyada ka dhank ah jinsiga waxay yihiin caadooyin aad u xun bulshada dhexdeeda taasoo dhibanayaasha xita ku keeni karta dhib ka xun kii soo gaadhay.


Noocyada saamaynta dacwadaha ka dhanka tacadiyada jinsiga:

Samaaynta jidh ahaaneed	Saamaynta maskax ahaaneed	Saamaynta bulshada
Nabaro Dhaawac Dhaawac soo gaadha xubina taranka sida infekshanada, AIDS ka DhicinUur aan loo baahnayn Ilmo iskasoo tuurid aan habonayn Naafo Dhimasho	Wal wel Wareer iyo cabsi Cadho Dhakafaar Xishood, is eedayn kalsooni daro Khalkhal maskaxda kuyimaad Fikiro xun sida nafta oo uu iska jarro.	Eedaynta dhibanaha Takoor bulsho In bulshada laga dhex saaro Dhibaatooyin galmo Doorkii uu bulshada ku lahaa oo luma In waxbarashii ka hadho Inay yaraato fursad shaqo Inay yaraato xirfadii waalidnimo

5. Talaabooyinka lagu ilaalinayo sirta

- Ha ku faafin dibada macluumaadka dhibanaha iyo maragyada (Sida asxaabta, xubnaha qoyska iyo dadka jaarka ahba).
- Waxaad la wadaagi kartaa macluumaadka dhibanaha daryeel bixiyayaasha (sida ururada aan dawliga ahayn, caafimaadka ama daryeelayaasha maskaxda adeeg bixiyaasha kale) LAAKIIN waa inaad ogaysiisaa oo uu la socdaa dhibanaha ay khusayso (sida waalidka iyo cida ka masuulka ah hadii uu caruur yahay).
- Ku warayso dhibanaha/maraga qol gaar ah oo ay kula joogaan baadhayaasha iyo dadka kale ee la ogolyahay joogitaankooda/ ama uu dhibanu codsaday in ay joogaan.
- Ilaali sirta dhamaan xogta iyo diwaanka dacwadaha ka dhanka ah jinsiga, meel amaana ahna dhig, sida ugu haboon kabadh qufulan oo kale. Hakaga tagin galalka xafiiska iyo maxkamadaba.
- Ka saar macluumaadka shaqsiga ah (sida magaca, ama cinwaanka) dhukumantiyada dadku arki karaan sida. Tusaale ahaan ka masax ama qari magacyada si ayna dadku u arag.

6. Talaabooyinka ay qaadayaan dacwad oogahayaashu inta uu kiisku socdo



6.1 Talaabada 1aad – In dib loo eego galka booliska, go’aan in laqaato lagu oogayo ama aan lagu oogayn.

Tixgalinaha dib u eegista galka booliska	Haa	Maya
Daboolka maka rogaysaa dacwad jawaab u baahan?		
Eedayntu maxay tahay?		
Eadaymo badan ma jiraan?		
Cadayamaha ma la qaadan kaaraa?		
Cadaymaha malagu kalsoonaan karaa?		
Cadaymuhu ma dhamays tiran yihiin – baadhitaan dheeraada ma loo baahan yahay?		
Dhibanuhu ma bad qabaa?		
Dhibanuu ma helay adeeg gargaar ?		

1. Soo saar dambiga saxda ah ee lagalay adoo eegaya cadaymaha lahayo: Hadii lagu guulaysan waayo in lagu guul daraysto in la cadeeyo dambiga saxda ah waxay hor istaagi kartaa in xeer ilaalintu guulaysato.

Waxaa sidoo kale muhiima in aan eedaysanayaasha laga hoos marin eedaynta

Tusaale ka hooseeya eedii:

Gabadh ayaa ka soo cabatay nin in uu isku dayay inuu kufsado, isagoo dharka ka saaray iskuna dayaya inuu ku biyo baxo kahor intaanu qof sadeexad kasoo gaadhay oo uu ka joojiyay.

Waxaa lagu soo eedayn lahaa qodobka 398 iyadoo lala akhriyayo 17, LAGUMA eedayna qodobka 399.

2. Ogaw qaybaha dambiga uu ka kooban yahay: kala saar qaybaha dambiga ee aad filaso in cadaymaha la heli karo khuseeyaan.

3. Adeegso cadaymaha: Isku day inaad ogaato inay cadaymo la heli karo oo taageeraya qayb kasta oo dambiga ka mid ah. Tani waxa lagu ogaan doonaa galdalooliyinka kiiska iyo wixii baadhitaan dheerada iyo cadaymo loo baahan yahay.

6.2 Talaabad 2aad – Diyaar garawga Dacwada

a) *Si loo waraysto dhibanaha iyo maragaba:* talaabooyinka laga rabo inay dacwad oogayaashu qaadaan si loo xaqiijiyo in dhibanaha la ilaaliyo, sirtiisa la ilaaliyo, lana ixtiraamo, waxaa ka mida ah:

- Isku inaad yarayso inta jeer ee uu qofku dhibantu/dhibanahu ka sheekaynayo dhacdada.
- U sharax nidaamka baadhista iyo maxkamada, iyo doorka uu ku leedahay.
- U sharax doorkaaga.
- Ilaali sirta dhibanta kuna warayso meel gaara
- Ixtiraam aragtiyaha dhibanta xitaa hadii ayna kaa caawinayn baadhitaanka
- Sii dhibanaha fursada uu kula socon karo qof uu ku kalsoon yahay
- Haku goomanin dhibanaha inaanu runta sheegin.
- Haku waraysan waji cadho ka muuqato
- Haka qaadin wax waraysi ah hadii dhibanuhu uu ooyayo ama uu xanusanayo
- Waqti sii dhibanaha sii uu isku dajiyo markuu shaakada kuu sheegayo, waqti nasasho ah u dhaxaysii hadii loo baahdo
- Sheekada iyo warbixinta dhibanaha ha u qorin sidaan u qaadatay. Tusaale, hadii gabadh iyo wiilku hore isku yiqaaneen, taasi waxba iskama khuseeyaan.

b) *La tacaalida dhibanayaasha/maragyada caruurta ah*

Samee kuwan:

- Ilmaha yar sii fursad adigoo yara kantaroolayana:- u sharax sababta halkaa loo keenay iyo waxa xigi doona.
- Adeegso luuqad ku munaasab ah da'da iyo marxaladaa uu ilmuhu ku jiro
- Kula hadal ilmaha yar meel badqabta oo xasiloon halkaasoo u sahli karta inuu dareenkiisa iyo fikirkiisa cabiro
- Isdaji dulqaadna yeelo. Ilmaha yar ku dhe fariimo soo dhawaynaya, sida “qaladkaagii ma ahayn,” “inaad cabsataa waa wax isk caadi ah,” “geesi baa tahay,” “way fiican tahay inaad ka sheekayso, hada wixii ka danbeeya dib u dhici mayso.”
- Ka ilaali ilmaha yar wax walba oo ka cadhaysiin kara.
- Usheeg ilmaha yar inuu u diidi karo haduu qolka uu joogo qof aanu rabin oo dhagaysanaya sheekadiisa.
- Umuuji diirdiiranaan iyo kalgacayl ilamaha yar laakiin u firso inuu caadi dareemayo.
- Wakhti ku filan sii ilamaha si aad u ogaato wixii dhacay.

Ha samynin kuwan

- Haku qasbin ilamaha inuu kahadlo waxa xun.
- Hataaban oo laabta ha galin ilmaha hadaanu rabin.

- Haku ciqaabin ilmaha dabeecadaha xun xun..tusaale, dagaalka, galmada, dabeecada, caasinimada.
- Haku aflaagaadayn ilmaha yar adoo ka sheekaynaya dhacdooyin kusheeya qoyska, qaraabada, iwm.

c) *Xaqiijinta cadaymaha*

In cadaymaha la xaqiijiyaa waxay ka timaadaa meel kale ee kama timaado dhibanaha. Sheeko uu kuu sheegay dhibanuhu islamarkaana qof kalana kuu sheegay maaha xaqiijin cadaymo. Laakiin waxaa ku jira kuwan:

- Qiraalka eedaysanaha
- Qoraalada maragyada
 - Eedaysanaha waxaa la qabtay isagoo gacmihiisu cas yihiin
 - Xaalada adage ee uu dhibanhu ku sugan yahay fal ka dib (sida, dhibanaha oo ooyaya, dharka oo wax ka muuqdaan)
 - Eedaysanaha oo la arko isagoo goobta falka kasii cararaya
- Warbixinta caafimaad ee sheegaysa dhaawacyada dhibanaha (ee uu qoray dhahkhtar ama sarkaale kale oo caafimaad)
- Sawirada dhaawacyada dhibanaha
- Dharka hoos ka gashiga ee dhibanaha/nigisyada
- Dhiig, biyo ama waxyaabo kale oo ku dul yaala dharka dhibanaha
- Walax kale oo loo adeegsaday falka
- Sawirada iyo sawir gacmeedyada goobta uu falku ka dhacay
- Dhukumentiyada sheegaya da'da dhibanaha

d) *Dacwad bilaabida*

- Qaybaha dacwada oo la ogaado/ Ogaanshaha qaybaha dacwada.
- Cadaymaha la heli karo oo la adeegsado
- Cadaymaha ku taageeraya ood gacanta ku hayso

Waa maxay aragtidu? Masoo bandhigi kartaa warbixin yar oo sharaxasa dabeecadaha dhibanaha?

- a) Gunaanad noocee ah ayaad ka dalbanasaa maxkamadu in ay gadho?
- b) Cadaymo noocee ah ayaa taageeraya gunaanadkaas?
- c) Maxaa kaleee soo jeedimo ah ayaad maxkamada ka rabtaa inay samayso?

e) *Go'aansashada eedaynta*

Marka aad kama dambaysta go'aan ka gaadhaso waxa aad eeda ka dhigayso, waxaad eegtaa inaad cadaymaha kaaga soo baxeen eedaymo badan. Qayb isku mida oo ka mida xogta ayaa soo badhigi karta dambiyo kala duwan, kuwaasoo dhamaantood lagu eedayn karo.

Eedayntu waa arin kale. Hadii uu jiro garsoore isticmaalaya qodobka 124, xeer ilaalintu waa inay ku eedaysaa mid taa ka fudud. Si cad eedaymaha usoo bandhig bilawgaba si oo kala doorto.

f) Soo bandhigida cadaymaha

Qodabka 71 ee xeerka habka ciqaabta wuxuu u baahan yahay dacwad oogaha inuu difaaco macluumaadkan soo socda ee eedaynta ku jira:

1(d) dambiga la xukumay, maca dacwadii, tibaax kooban oo ah falkii uu ka koobnaa dambigu oo ay ku jiraan wakhtigii iyo goobtii uu ka dhacay, iyo ruuxa dhibanaha ku noqday ama shayga dhibanaha ku noqday kaasi, oo ah ka dambiga lagu galay.

(e) Sharciga, iyo Qodobada xeerka ah ee lidka ku ah dambiga la sheegay inuu dhacay.

(f) Bayaan ku saabsan asbaabaha dembiga cuslaynaya

(g) Astaamaha guud ee shaqsigaa dhinaca dhaawacu soo gaadhay iyo ruuxa loo arko in uu noqday bilaa dembi marka loo eego xaaladaha duruufihii dembiga.

6.3 Talaabada 3aad – udiyaar gorowga dacwada ka hor

- Taariikhda marag furista, wakhtiga iyo goobta.
- Sii dhibanaha iyo maraga faahfaahinta dacwada goor hore sidoo kale ogaysii inyar ka hor maalinta dacwada.
- Xaqiiji in la sugo amaanka dhibanaha/maragyada markay maxkamada imaadaan si looga ilaaliyo aragtiyaha dhinaca difaace, maragyada kale iyo xubnaha qosyska.
- Waxaad ogataa in dhagaysigaa iyo dacwadaba camarad laga duubayo (Maaha dhagaysi furan).
- Hubi inaad wixii cadaymo ah ee aad soo bandhigayso inay sifiican u diyaarsan yihiin, bad qabaan, fahana ka haysato sidii aad usoo jeedin lahayd.
- Sii diyaarso sidii aad usoo jeedin lahayd doodaada, cadaymahuna ku jiraan.
- U diyaari in su'aalo baadhitaano ah la waydiinayo maraga/dhibanaha una sharax qaabka.
- U sharax gaadiidka jira. Usheeg maraga xililiga laga rabo maxkamada iyo meesha ay ku sugayaan.
- Hadii ayna soo gaadhi karayn maxkamada intaanay dacwadu bilaabmin, u sawir maxkamada. U sharax dadka kala duwan ee iman doona qolka maxkadama.

6.4 Talaabada 4aad – Dacwada

- Ilaalinta – Ka feejig naw inay eedaysanayaashu ama dadka la socdaa u soo dhawaadaan dhibanaha.
- Waajibka saran xeer ilaalintu waa in la helo dacwad xaq ah – Ujeedadu maaha uun xukun laakiin waa xukun ku salaysan cadaymaha.
- La kulan dhibanaha wakhti fiican ka hor inta ayna dacwadu bilaabmim. Isku day inaad u sheegto inay dib u eegto/eego qoraaladii laga sameeyay si ay u cusboonaato xusuusteedii.
- Dib u eeg cadaymaha. Ku bilow dhaarta. U sharax waxay dhaartu tahay, usheeg maraga inuu kaadaba yidhaa waxaad leedahay. Baadhitaanka tooska ah usii gudub. Dabeedna u sharax ujeedada baadhitaanku inay tahay in la tijaabiyo in maraga si sax ah u fahmay su'aalaha, si daacad ahna u jawaabo.
- U sharax muhiimad ay runtu leedahay. Una sheeg in uu isku dayo inuu su'aalaha uga jawaabo inta ogaalkiisa iyo xusuustiisa ah. Ma jirto jawaab sax ama qalad ah.
- Hadii iyadu/isagu fahimin su'aasha, wa dalban kartaa/karaa in aloogu celiyo su'aasha. U sii diyaari si ayna su'aaluhu ug cadhaysiin. Ucaddee inay/inuu kuu sheegto/ sheego hadii ay ka cadhaysiiyaan su'alaha ay waydiinayaan dhinaca difaacu.

Inta dacwada lagu jiro, waxaa laga yaabaa dhibanuhu/maragu uu dareemo cabsi iyo cidhiidhi badan. Tani waxay saamayn kartaa tayada cadaymaha waxay sidoo kale keeni kartaa in dhibanuhu kalaba baxo dacwadiisa nidaamka.

La tacalida dhibanayaasha aan kula shaqaynayn

Dhibanayaasha la caawiyo ee sifiican loo qaabilo oo ay dad xirfadaysan gacan qabtaan way yar tahay inay dacwadooda nimaadka kala baxaan goor danbe, waxayna u dhaw dahay inay si cad u sheegaan waxay rabaan ee ay dareemayaan.

Hababka suurta galka ah ee aad kula taacalayso dhibanaayasha aan kula shaqaynayn:

- Inaad goor hore la xidhiidho dhibanaha si aad macluumaad kasiiso dambiga, habka ciqaabta ee maxkamada iyo doorka ay ku leedahay. U sharax talaabooyinka habka nimaadka ciqaabta uu marayo iyo adeegyada jira (sida hoy, kaalmo caafimaad)
- Isku day inaad fahanto cago jiidka dhibanaha oo aad sheegto, haday suura gal tahay. Tusaale ahaan dacwadaha gudaha ah, dhibanuhu waxaa uu u qaadan karaa in dacwad ooguhu ka filayo inay faraha ka qaado eedaysanaha. Dacwad ooguhu waa inoo u cadeeyo inay iyadu go'aanka iska leedahay, ee dacwad ooguhu aanu lahayn. Fariinta la gudninayo waa in labadooduba ay ka wada shaqaynayaan sidii ay u dhamayn lahaayeen falkan.
- Ka fikir hadii loo baahan yahay in loo yeedho khabiir dhinaca maraga ah sii u sharaxo sababta una dhibanuhu wadashaqayn u lahayn ama u diidayo maraga.
- Isku diyaari inaad dacwada sii wada maraga dhibaha la'aantii. Xeer ilaalinta iyo boolisku waa inay kawada shaqeeyaan sidii loo dhisi lahaa dacwada si loo cadayn karo maraga dhibanaha la'aantii. (sida, qoraalo hore, xidhiidhada deg dega ah sida diwaanka telefoonada, sawirada dhibanaha, eedaysanaha iyo goobta falka).

Waxaa lagasoo xigtay buuga UNODC 2013 ee dacwad oogista haboon ee dambiyada ka dhanka ah dumarka iyo hablaha

6.5 Talaabad 5aad – Dacwada ka dib

Hadii eedaysanaha lagu helo dambi, magdhaw ayay maxkamadu ku ridi doontaa. Dhibanuhu wuxuu dareemi karaa masuuliyad hadii eedaysanaha dambiga lagu helo lana xukumana. Dacwad ooguhu waa inuu u sharaxaa eedaysanaha waxaa dhacay inay tahay wax ka baxsan kaantaroolka dhibanaha oo ay kaliyaata warbixinta keentay.

Hadii aan eedaysanaha dambi lagu helin, dhibanuhu waxay u qaadan kartaa in aan sheekadeedii la rumaysan. Dacwad oogaha ayaa doorkaa leh inuu u sharaxo waxaa dhacay iyo sababaha. Laga yaabaa waxaa jirin cadaymo ku filan.

Markasta oo suurta gal ah, isku day inaad dhibanaha/maraga uu helo adeegyo iyo taageero sii socota.

LIFAAQA KOWAAD: QAABDHISHMEEDKA SHARCIGA QARANKA

1. Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland

2. Xeerka Ciqaabta: Dacwad ooguhu wuxuu dabaqi doonaa qodabadan soo socda ee xeerka ciqaabta eedayn ahaan marka ay qaadayaan dacwadaha tacadiyada ka dhanka jinsiga:

- Qodobka 17: Dambiyada la isku dayay
- Qodobka 322: Ujeedo wada shaqayn sii loo galo fal dambiyeed
- Qodobka 398: Kufsi
- Qodobka 400: Dambiyada aan caadi ahayn oo rabshad wata
- Qodobka 402: falalka axmaqnimada ah

3. Xeerka nimaadka garsoorka caruurta: Qodadan soo socda ee Xeerka nimaadka garsoorka caruurta ayuu dacwad ooguhu tix galin doonaa marka eedaysanuhu uu caruur yahay:

- Qodabka 8 : Ka xayubbin hanti
- Qodabka 10: Massuliyada Dambi
- Qodabka 12: Mamnuuca ciqaabaha qaar

4. Mabaadii'da shareecada ee hagaya magdhawga

LIFAAQA LABAAD : WAREEGTADII XEER ILAALIYAHA GUUD EE KUFSIGA

Jamhuuriyadda Somaliland Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka JSL:



XIG/JSL/ 534 /2014.

07/09/2014.
Hargeysa.

Ku:- Dhamaan Kuxigeenada Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL	Fadhiyadooda.
Og:- Dhamaan Gudd. Maxkamadaha Gobolada Dalka	Fadhiyadooda.
Og:- Dhamaan Gudd. Maxkamadaha Rafcaanada Gobolada Dalka	Fadhiyadooda.
Og:- Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee JSL.	Hargeysa.
Og:- Guddiga Sare ee Cadaaladda JSL	Hargeysa.

Ujeedo:- Heshiisyada ka Dhanka ah Dacwadaha Kufsiga

Mudanayaal:-

Waxaa waayahan dambe soo batay dhicitaanka faldembiyeedka kufsi wadareedka iyo kufsi si gooni ah loo geysto oo lagula kaco hablaha, looguna geysto dhaawacyo mid jidheed, maskaxeed, iyo xubinta tarankaba, waxaana lagama maarmaan ah in si wada jir ah culeys loo saaro si ay u yaradaan aafadaasi kufsigu.

Haddaba, waxaa jirta oo aan la dafiri karin inay dhinacyadu ama odoyaal dhexdhexaad ahi ay mararka qaarkood dacwadahaasi heshiisyo qoraal ah ka keenaan, heshiisyadaasi oo dhiiri geliyey geysashada falkaasi kufsiga, isla markaana in badan ka qayb qaatay inay dembiilayaashii ka fakadaan ciqaabtii ay huteysan lahaayeen, iyadoo ay jiraan dedaalo caalami ah oo lagula dagaalamaayo kufsigu iyo dhibaataada uu ku leeyahay bulshada.

Sidoo kalena, waxaa dhacda marka la dabaqaayo sharciga in Garsoorayaasha Maxkamaduhu iyagoo xaq u leh inay dabaqaan sharciga si waafaqsan Qod.109 XCG, inay ka hoos maraan ciqaabtii uu sharcigu uu u dhigay falka kufsiga ah ee ahayd ciqaab u dhaxaysa 5 ilaa 15 sano oo xadhig ah sida ku xusan Qod. 398 XCG, hase yeeshee mararka qaarkood waxaa dhacda in Garsoorayaashu ka hoos maraan ciqaabtaasi kuna xukumaan hal sano ama laba sano oo xadhig ah, ciqaabtaasi oo aan meelna kaga oolin sharciga, isla markaasina aan wax tixgelin ah Garsoorayaashu aana siinin asbaabaha dembiga cusleeya ee Xeerka Ciqaabtu dhigaayo, sida faldembiyeedyada kufsi ee loo galo wadarta ee uu tilmaamayo Qodobka 71 XCG, ama asbaabaha kale ee ku xusan Qod. 39 iyo 110 XCG.

Sidaasi darteed, waxaa la farayaa dhamaan Kuxigeenada Xeer Ilaaliyaha Guud ee Gobolada Dalka si loo adkeeyo arrintaasi in cidii heshiis ka keenta laga diido, lagana heshiin Karin Dacwadaha kufsiga ah ee ku xusan Qodobka 398 XCG.

Guddoomiyayaasha Maxkamadaha Gobolada iyo Rafcaanadaba waxaa laga codsanayaa inay sidaasi Xeer Ilaaliyayaasha la faray ku ogaadaan, in si wada jir ah olole loogu qaadayo lagu yareynaayo dhacistaanka faldembiyeedkaasi iyo ciqaab marinta Dembiilayaasha.

Guddoomiyaha Maxkamada sare, isagoo tixgelinaya qoraalkii aanu muddo hore usoo gudbinay iyo qoraalkan hadda. waxaa laga codsanayaa inuu sidaasi ku amro dhamaar Garsoorayaasha Maxkamadaha Dalka si layskula jaanqaado, lana joojiyo heshiisyada ka dhanka ah dacwadaha kufsigu, loona helo cadaalad sugan oo saameysan dalka oo dhan.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)
Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.



LIFAAQA SADEXAAD: KUFSIGA

Halkan waxaa ku qoran woxogaa tusaalooyin ah oo ah sida uu badan u dhaco kufsigu:

- 1. Rape only occurs between strangers in dark places.**
Kufsigu waxuu ka dhacaa meel madoow, dad aan aqoon isu lahayna ayuu ka dhex dhaca.
- 2. Women provoke rape by the way they dress/behave.**
Dumarku iyagaa sabab u ah kufsigu oo habka aay u labistaan amaba u dhaqmaan ayaa sababta.
- 3. Women who drink alcohol or use drugs are asking for it.**
Dumarka khamriga caba amaba isticmaala maan dooriyeyaasha kale iyagaaba dalbada.
- 4. Rape is a crime of passion.**
Kufsigu waa dambi shucuur ah.